



CHRIS SPENCE

Director of Education

TEL (905) 527-5092 EXT.2297 FAX: (905) 521-2539

April 15, 2009

Waalidka/Mas'uulka :

RE: Baarista Sinaanta Ardeyda

Hamilton-Wentworth District School Board (Waaxda Gudiga Iskuulaadka ee Hamilton-Wentworth) ayaa waxaay qabanayaan su'aalo tixgelin ah oo loogu talagalay ardeyda dugsiya sarre, fasalka 10 iyo 11 xiliga bisha Maajo ilaa Juunyo waxaana jeclaan lahayn in aad noo ogolaato si ilmahaaga uga qaybgalo.

Sababta loogu talagalay su'alaha tixgelinta ardeyda waa in:

- la siiyo Waaxada faahfaahin ku sabsaan isku dhexjirka mujtamaca ardeydeena
- la isticmaalo faahfaahinta in lagu balaariyo barnamijyada ama la siiyo ardeyda fariimo ay ka bartaan dhaqamada, qeybaha diinta, barashadooda gaarka ah, iyo duwaanasha jirka.
- in la habsado qolada waxbaraashada HWDSB ee ku taageersan waxbarashada ku sugan xaalad nabadeed.

Adigoo raali ka ah, ilmahaagu waxaay buuxin karaan su'aalaha ku saabsan shaqsi ahaantoda (sida dhaqankooda, diintooda, dookha jirkooda, barashadooda gaarka ah) iyo waxyaalaha kala kulmeen iskoolka (barashadooda xeerka ay maraayso, midabtakkor, hawada iskoolka, hamiga mustaqbalkooda) su' aalaha waxaa lagu dhameyn karaa qaybta kombutarada. intarnedka, ayadoo macaliimin ay goobjoog yihiin, waxaay qaadaneys 15 daqiiqo ee wakhtiga kalaska. magaca ilmahaaga laguma laguma daraayo warqada ama lama cadayn doono. Qofkii jawaabaha bixiyey lama cadeynaayo.

Ogaanshaha ictiraafka wada deganaasha ayaa horey usocdey iskoolkiiba. Waxaanaminsanaahay ka qaybgalka su'aalaha in wax tar u noqondoonaan ardeyda ka qaybgashey. Ilmahaaga way dhamays tirikaraan su'aalaha ama way ka tegi karaan su'aasha ay rabaan ama way joojin karaan in ay buuxiyaan waqti kasta ay rabaan. Ilmahaaga, hadii ay doortaan in ay buuxinin waxba kalama kulmaayaan xaga buundooyinka ama iskoolka haba yaraatee.

Fadlan dhamaystir foomka lasocota warqadaan hadii ilmahaga aad u fasaxday inay ka qaybgalaan iyo inkale. Shaqalaha xafiiska ayaa habeen doona foomamka fasaxa markay yimaadan, waxayna ku xaraayn doonaan sanduq xafiska waayn yaala. Hadi aad fasax u siisay ilmahaga in ay ka qaybgalaan, waan u yeeri doona.


Su'aalaha tixgalinta ardeyda waxaa ilaalin doona Waaxda Gudiga Baarista (E-BEST, Evidence-Based Education and Services Team). Hadii ad su'aal ka qabtiid su'aalaha tixgalinta ardeyda, fadlan la xiriir Dr. Kathy Short Kathy.Short@hwdsb.on.ca ama 905-304-8722, extension 201.

Hadii aad u baahato in aad aragto sua'alah koobigooda, fadlan la soo xiriir jiheediyaha iskoolkaga ama boqo www.hwdsb.on.ca sii aad u aragto su'aalaha internetka . Marka iskoolada dhan dhameeyaan su'aalaha warbixin ayaa loo diri doona iskoolada sare oo dhan.

Baaritaankaan waxaa dulmaray oo yeelay McMaster University Research Ethics Board. Hadai aad wax walwal ama su'aal xaqaaga aad ka qabto waxaad la xiriiri karta: McMaster Research Ethics Board Secretariat at 905-525-9140, ext. 23142 or email ethicsoffice@mcmaster.ca

Bilowga iyo dhamayska, su'aalaha tixgalinta ardeyda waxaa loo qaban dona sii qiimo sare leh. Ilmahaga fa'idadiisa iyo nabadisa waa lagu ilaalinaaya waxaan rajeyneynaa in aad nagu aaminto xaalkan waana ku mahadsantahay ka qayb qaadashada.

For our students,



Dr. Chris Spence
Director of Education